

Habraaca waalidiinta ee Burcadda (jirrida)

Haddii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah, kala xiriir **Xaruunta Dhexe ee Dhallinta Jirrida (National Youth Gang Center™)**

Post Office Box 12729

Tallahassee, Florida 32317

Phone: (850) 385-0600, ext. 224

Fax: (850) 386-5356

E-mail: nygc@iir.com

Web site: www.iir.com/nygc

For more information about gang-related documents and materials, contact the Juvenile Justice Clearinghouse at (800) 638-8736.

Office of Juvenile Justice and Delinquency Prevention, Office of Justice Programs, U.S. Department of Justice. Points of view or opinions in this document are those of the Institute for Intergovernmental Research® and do not necessarily represent the official position or policies of the U.S. Department of Justice.

Hagahan waxaa loogu talagalay inuu waalidka siiyo macluumaad, si ay u garwaaqsadaan, uguna hortagaan hawlqabadyada burcadda/jirrida.

Dabeecadaha la hal maala ku biirista burcadda/jirrida

Sannadaha hore ee korriimada (12-14 sano) ayaa ah waqtiga ugu adag dhallinta ayna arkaan ama ka fekeraan inay burcad ku buiiraan. Dhallinta laga yaabo inay ku lug yeeshaan burcadda ayaa muujin kara dabeecadaha soo socda:

Isbeddel wax dhimaal leh ee dhanka dabeecadda, sida:

Qoyska oo ay isaga dhex baxaan.

Hoos u dhac ama yaraan shoo tegidda ama aadidda dugsiya.

Guriga oo dibadda looga maqnaado ammin dambe sabab la'aan.

Rabitaan aan innaba caadi ahayn ee wax qarar.

Dabeecad dagaal u joog ah, sida hadal naq, juurfal tiraab ah, cay iyo xushmo darro xukunka waalidka..

Fikrado wax dhimaal oo kadis ah, kuna saabsan sharci-fuliyeyaasha, ama dadka waaweyn ee dugsiya ka shaqeeya (saraakiisha dugsiya ama macallimiinta).

Bedelaadda dabeecadda ku saabsan dugsiya, kaniisadda, ama waxqabadyada kale ee caadiga ah, ama beddelaad fikradaha waxqabadyadaasi.

Xiisaayn aan caad ahayn ee hal ama labo midab dhar ah ama leh qormo gaar ah.

Xiiseeya miyuusigga duufsiya jirrida, fiidiyowyo iyo filimmo.

Adeegsada kuna tababar qaata astaamaha gacmaha si ay ula xiriiraan asxaabtooda.

Calaamado ama sawirro aan caadi ahayn ee buugaagta dugsiya dushooda, buugaagta wax lagu qoro, ama darbiyada/gidaarrada dushooda.

Isbeddel la dareemi karo ee habka timaha iyo labiska ama iyadoo ay jiraan koox saaxiibbo ah oo isku si u lebbisan timahana u firta/sallaxda.

Ka bixid/fogaansho saaxiibadii mudada dheer iyo ku xirnid kooxda guud ahaanba asxaab cusub ah..

Lagu tuhmo qaadasho maan dooriye, sida aalkolo, waxyaabaha la dhuuqo iyo maandooriyeyaasha.

Haysasho waxyaabaha qarxa, rasaas ama hubab kale.

Dhawacyo jireed oon maqaadiir ahayn, sida la garaacay ama dhaawacyo gacmaha ama faruhu halka ay isaga xiran yihiin, dagaalna ka soo gaaray.

Lacag iyo badeeco aan la sheegi karin halka ay ka yimaadeen, sida dhar iyo dahab.

Astaamaha lagu garto burcadda/jirrida

Dharka iyo labiska hanaanka burcadda (Gang-style clothing and dress):

Xubnaha burcadda ayaa laga yaaba inay isticmaalaan hab gaar ah ee labbis, si loogu garto burcad gaar ah, ku dhejin, gaashaan-buur ama koox. Taasi waxaa ka mid noqon kara dhar ama dhar afar geesle ah ee suuf midabaysan ama xariir ah (bandanas) oo laga gashado keliya noocyo gaar ah kuwaasoo matala burcad/jirri.

Dharka kale ayaa laga yaabaa inay gashadaan xubnaha burcadda ayey ka mid noqon karaan saraawiil laga xidho dhexda ka hoos xagal-daaco leh (saggy): Funaanad leh hal-ku-dheg burcad lehna sawirro xubno burcad ah, tusmo xabsi sawirro erayo xoqan, laguna buufiyey derbi (graffiti), hal-ku-dhegyo; labo- ama saddex kuulood oo luqun gashi ah, dhar isboortiyeed kooxo gaar ah, ama suuman astaamo gaar ah lagu calaamadiyey, inta badan bir xadiid ah uuna ku qoran yahay xarafka uu ka bilawdo burcaddu/jirridu.

Si kastaba ha ahaatee, moodada dharka burcadda ayaa isbeddela, dhici karana meelba inay meesha kale ka gedisan tahay, marka dharka keligiis ma aha mid ku filan in lagu tilmaamo in cunuggu xulafo la yahay burcad gaar ah, balse waxay noqon kartaa, wuxuun wax kuu bilaaba ama irrid shaki kuu fura(clue).

Midabbada (Colors):

Jirri/burcad fara badan ayaa u adeegsata astaan ahaan hal midab ama wax ka badan inay metesho jirridooda.

Midabbadaasi ayaa loo labisan karaa shaati ahaan, xariir ama suuf afar geesle ah oo midabbo dhalaalaya leh, kuul midabbo badan ama hal midab leh, suun, koofiyad, kabo, xirgaha kabaha, dahab, dheemman ama waxyaabo kale.

Astaamo iyo lambarro (Symbols and numbers):

Astaamaha ama lambarrada qaarkood ayaa u leh muhiimad gaar ah dhaqanka jirrida ama burcad meel gaar ah ku nool. Dhawr astaamood oo caadi ah ee jiriyada ugu badan ee Maraykanka duub madax ah (shan –iyo lix geesle ah) fargeeto kor ama hoos tilmaamaysa, saddex dhibcood ee saddex geesle iyo lambarro. Kala xiriir booliska magaaladaada ama Waaxda Sherrifka si aad uga hesho macluumaad khaas ah iyo macnaha astaan ama lambar burcad ood garan weydey, ama aad ku aragto xuruuf lagu qoray dhar nawaaxiga aad ku nooshahay.

Shayada Isboortiga (Sports items):

Xarfaha, midabbada ama astaamo ayaa laga yaabaa inay macne khaas ah u leeyihiin burcad deegaankaaga ku nool, sida Kansas City Royals (KC = Kill Crips). Qalabka isboortiga ayaa laga soo iibsan karaa midabbo aan kuwa caadiga ahayn, si ay ula mid noqdaan midabadda jirrida ama waxaa lagu beddeli karaa qoraal iyo astaamo dheeraad ah ee lagu dul qoro.

Qormo ama erayo (Graffiti):

Burcadda ayaa adeegsada qormo ahaan erayo ay ku calaamadaynayaan deegaankooda, sumcaddooda ku faaniyaan, ugu tiiraanyoodaan xubnaha ka dhintay, isla markaasna ugu hanjabaan uguna shaf-garaacaan burcadda kale. Sababtaasi darted, Qormo ama erayo ayaa noqon kara kuwa khatar ah, isla markaasna ay lagama maarmaan tahay in si deg deg ah meesha looga tirtiro. Dhallinyarada ku lug leh Qormada iyo sawirradaas ayaa haysata shayada ay ka mid yihiin, rinjiga wax lagu buufiyo, caagad af dhuuban ee wax lagu buufiyo, calaamadiyeyaal af dhuuban leh, iyo buug ay ku qoran yihiin qaabka loo sameeyo oo weli socda, isla markaasna dharkooda ayaa yeelan kara rinji, boorsooyinka dhabarka ama shayada kale.

Qormo joogto ah jirka lagu sameeyo (Tattoos):

Qormada taatuuga ayaa loo adeegsadaa in lagu tilmaamo daacadnimada qofku u leeyahay kooxda jirriga/burcadda ah. Taatuuyadaasi waxaa ka mid noqon kara magaca, xafarafka koowaad ee magaca, ama astaam burcad gaar u ah, waxayna ku qornaan kartaa gacmaha, luqunta, wejiga, xabadka iyo gacanta.

Calaamadaha Gacmaha (Hand signs):

Burcadda qaarkeed ayaa adeegsada hab xubnaha gacanta si loo cabbiro dareen gaar ah, ama ay uga wada xiriiraan la halmaalka burcadda, isla markaasna ay ugu hanjabaan ama ugu babac dhigaan burcadda kale.

Muusigga Burcadda dhiirrigaliya & filimada (Gang-influenced music and movie):

Raabka burcadda/jirrida waa hanaan muusig lagu sifayn karo rabsho, hadal adag oo guubaabinaya dhaqanka burcadda jidadka. Aflaam can ah oo fara badan ayaa xoog saara burcadda jidadka iyo dhaq-dhaqaaqooda. Dhallinta ayaa laga yaabaa inay xiiseeyaan burcadda iyadoo u riyaaqaya muusigga iyo filimada sawir ahaanta u muujiya dhaqamada burcadda jidadka.

Waxay waalidku Samayn Karaan (What Parents Can Do)

Kala hadal carruurtaada burcadda iyo siyaabaha aad uga hortagi kartaan.

Ha ogaadeen inaad raalli ka ahayn jirrimada/burcadnimada, aanad doonayn inaad aragto iyadoo la waxyeelleeyey ama la xiray.

U sheeg ilmahaaga inayan:

La hal maalin xubno jirri/burcad ah.

Waqti ku dhumintin halka burcaddu isku urursadaan.

Ayan tegin kana qayb qaadan xaflad ama dhacdo bulsheed burcad soo qaban qaabisay.

Ayan isticmaalin nooc kasta oo ka nmid ah astaamaha fara oo macne u samaynaya burcad/jirri.

Ayan xiran dhar macne u samaynaya burcadda ku nool nawaaxigaaga.

(Ilmahaaga u sharrax in dharka caynkaasi oo kale ah uu khatar gelin karo, isla markaasna aadan u gadaynin ama u oggolaanaynin inay xirtaan. Haddii aadan ogsoonayn shayadaasi, la xiriir wakiilada fulinta sharciga nawaaxigaaga, si ay kaaga siiyaan macluumaad khaas ah burcadda agtaada ku nool.)

Ogsoonow Ilmahaaga Saaxiibadood iyo Saaxiibadood Waalidkood.

Ka digtoonow dabeecadaha maan dooriyeyasha, aalkolada iyo burcadda. Markii carruurta ay bilaabaan inay dareemaan cadaadis inay maan dooriyeyaal isticmaalaan ama ku biiraan burcad, sida badan waxay ka timaadaa saaxiibadood.

Kala hadal carruurtaada siyaabo ay ula dhaqmaan cadaadiska ugu imaan kara asxaabtooda.

Ku caawi ilmahaaga siyaabo fudud oo ay qabatimaan, isla markaasna uga jawaab celinkaraan cadaadiska kufkooda ama facood. Tusaale, Haddii cunugaaga ficiisu ku cariyu, “haddii aad saaxiibkay tahay, waad,” cunugaagu wuxuu ku jawaabi karaa, “Haddii aad saaxiibkay tahay imaad an weydiiseen.” Dabadeedna isaga/iyadu wuu/way ka tegayaa/tagaysaa.

U deji Xad adag carruurtaada & dhallintaada (Set firm limits with your children and teens).

Carruurta iyo dhallinta ayaa u baahan inay si bayaan ah u ogsoon yihiin waxa laga rajeynayo, iyo cawaaqibka ay leedahay markay sida xun u dhaqmaan. Ilmahaaga ha ka badbaadin cawaaqibka uga yimaada go'aannadooda.

Qorshee Waqti qoyseed (Plan family time).

U same waqti qoyskaagu wada cayaaran, cunto wada cunaan, wada safraan (xataa meelaha hawaayadaha iyo jirdiinooyinka ama waxqabadyada), dhawra caadada qoyska, isla markaasna yeesha kulammo qoyseed eed uga wada hadashaan qorshayaasha, dareenka iyo dacwooyinka.

Hadii aad u baahan tahay macluumaad dheeraad ah kala xiriir Xaruunrta Dhexe Dhallinta Jirrida (For more information, contact the **National Youth Gang Center™**)

Post Office Box 12729

Tallahassee, Florida 32317

Phone: (850) 385-0600, ext. 224

Fax: (850) 386-5356

E-mail: nygc@iir.com

Web site: www.iir.com/nygc

Hadii aad u baahan tahay macluumaad iyo waxyaabo dheeraadka, booqo shabakadda Adeegyada Raadraaca ee Garsoorka Dembiyada Qaranka (National Criminal Justice Reference Service (NCJRS) Web site at www.ncjrs.gov.

Office of Juvenile Justice and Delinquency Prevention, Office of Justice Programs, U.S. Department of Justice. Points of view or opinions in this document are those of the Institute for Intergovernmental Research® and do not necessarily represent the official position or policies of the U.S. Department of Justice.